Ramadaan

Sidee lagu gartaa soo gelitaanka bisha **Ramadaan?**

1 Aragtida dayaxa bisha Ramadaan

Nabigu s.c.w. wuxuu yiri: “Sooma markaad aragtaan dayaxa bisha Ramadaan oo afura markaad aragtaan dayaxa bisha soon fur” (Al-Bukhaari 1800, Muslim 1081) haddaba markuu arko dayaxa bisha Ramadaan qof Muslim, caaqil, qaan gaar, **caadil ah lagu kalsoon yahay warkiisa iyo ammaanadiisa dayaxa bisha Ramadaan,** waxaa sidaas ku sugnaaday soo gelitaanka bisha, waana xil saaran dadka inay billaabaan soomidda bisha Ramadaan.

Waxaa lagu xaqiijiyaa soo gelitaanka bisha Ramadaan labo arrimood **middood:**

2 In shacbaan noqdo soddon maalmood buuxsamo

Waayo bil dayaxeedka, ama waa sagaal iyo labaatan maalmood ama soddon maalmood, mana ka bato intaasi, marka hadduu ku buuxsamo bisha shacbaan soddon maalmood, arrinkaasi macnahiisa waxaa weeye billaabashada bisha Ramadaan, waayo Nabigu s.c.w. wuxuu yiri:” “Sooma markaad argtaan dayaxa bisha Ramadaan, haddiise aad arki weydaan dhammeystira tirada bisha Shacbaan soddon” (Al-Bukhaari 1810, Muslim 1081).

Yaa loogu noqdaa xagga soo gelitaanka bisha Ramadaan iyo ciidda?

Hadday Muslimiintu yihiin tiro yar ku nool beled aan Muslim ahayn waxay raacayaan waxa ay yiraahdaan rugaha iyo hey’adaha Islaamka ee ka jira halkaas, hadday iskhilaafaan hey’adaha iyo rugaha islaamkaa, waxaa xil saaran ah inay raacaan rugta islaamka ee ku yaal magaalada ay ku nool yihiin, ama masjidka weyn ee jaamaca ah ee ku yaal magaaladaa, ama masjidka jaamaca ah ee uu ku tukado, sidaas waa inuu ku dadaalo wada jirka muslimiinta intii uu ku dadaali karo.

Ogeysiiska ramsiga ah ee ka soo baxa beledka ay ku nool yihiin muslimiinta.
Nabigu s.c.w. wuxuu yiri: “Soon furkiinna waa maalinta aad soonka furtaan, adxadiinnana waa maalinta aad udxiyeysaneysaan (Abuu Daawuud 2324, At-Tirmidhi 697)

Fadliga Bisha Ramadaan

Habeenka Laylatul Qaddarka

Uu Allaah noogu sheegay Kitaabkiisa in camalka wanaagsan ee la fashaa habeenkaa uu ka khayr badan yahay camallo la fasho waqtiyo badan. Allaah Kor ahaaye wuxuu yiri: “Habeenka Qaddarku wuxuu ka fiican yahay kun bilood”. (Al-Qadar: 3) Qofkiina u kaca habeennadaa salaatu leyl iimaan qab iyo ajar dalab waxaa loo dhaafaa wixii horey uga dhacay denbiyo. Waana habeen ka mid ah tobanka habeenood ee u dambeeya bisha Ramadaan, waxay ka billaabataa aadaanka Maqribka waxayna ku dhammaata waaberiga, cidnana ma oga waqtigeeda gaarka ah, sidaas awgeed waa inaan ku dadaalno cibaadada habeennadaa tobanka ah oo dhan.

Waxa loogala jeedaa 1000 bil

Waxaa la yiri waa sida ka muuqda macnaheeda, oo waxay le’eg tahay 1000 bilood

Waxaa sidoo kale la yiri waxaa loogala jeedaa ku xeel dheeraansho weynida ajarkeeda iyo fadligeeda, markaa kunka waxaa loogala jeedaa wax furan oo tiro badan waxaana looga muraad leeyahay inta ugu badan ee la siyaadsho, fadliga ilaahayna xad ma leh

Soo degitaanka Qur’aanka

Waa bisha uu Allaah u doortay soo degitaanka Kan ugu weyn Kutubtiisa oo ugu sharaf badan, Qur’aanka Kariimka, Allaah Kor ahaaye wuxuu yiri: “Bisha Ramadaan waa kaasi dhexdiisa Qur’aanka la soo waxyoodday, hanuun u ah dadka iyo xujooyinka cad ee leh hanuunka iyo kala saaridda. ee qof kastoo idinka mid ah ee jooga bisha waa inuu soomo inta lagu jiro” (Al-Baqarah: 185)

Waxaa la furaa albaabbada jannada oo la xirxiraa shayaadiinta

Waxaa la furaa bisha gudaheeda albaabbada jannada oo la xirxiraa shayaadiinta, Nabigu s.c.w. wuxuu yiri: “Markuu soo galo Ramadaan waxaa la furaa albaabada jannada, oo la xiraa albaabbada naarta, oo silsilado lagu xiraa shayaadiinta” (Al-Bukhaari 3103, Muslim 1079) Allaah wuxuu ugu tala galay addoomahiisa inay ugu soo jeestaan si dhan cibaadooyinka iyo ka tagitaanka xumaha.

Waxaa lagu dhaafaa dunuubta soonka iyo u kicidda salaadda habeennadaa

Haddaba qofkii sooma maalinkiisa oo u kaca salaad habeenkiisa, waxaa loo dhaafaa wixii horey uga dhacay oo denbiyo ah.

Nabigu s.c.w. wuxuu yiri: “Qofkii sooma bisha Ramadaan iimaan qab iyo ajar dalab waxaa loo dhaafaa wixii horey uga dhacay oo denbiyo ah”. (Al-Bukhaari 1910, Muslim 760)

Nabigu s.c.w. wuxuu yiri: “Qofkii u kaca salaatu leyl bisha Ramadaan iimaan qab iyo ajar dalb waxaa loo dhaafaa wixii horey uga dhacay oo denbiyo ah”. (Al-Bukhaari 1905, Muslim 759)

Duullaankii Cayn Jaaluut

H 685

Waa dagaalkii lagu kala baxay ee dhammeeyey duullaankii ay ku soo qaadeen Maghuulka dalalka Muslimiinta, waxaana hoggaaminayey suldaan Qadhaz iyo hoggaamiye ciidan Bibris, waxayna ku taal Cayn Jaaluut waqooyiga Falastiin, waxayna ahayd dhacdadaas 25kii Ramadaanka sannadkii 685 hijrada waafaqsan 1260miilaadiga

Furashadii Camuuriyadh

H 223

Wuxuu amirkii Cabbaasiga ahaa Al-Muctasim bil Ramadaan hoggaamiyey ciidan aad u weyn sababta haweeney muslimid ah oo uga soo qeyla dhaansatay darteed xadgudubyo ay u geysteen ciidammo kirishtaan ah uu hoggaaminayey Tiyuufil miikhaa’il. Markaasuu hareershay Camuuriyah oo ah magaalo ku taal Turkiya maanta, wuxuuna furay magaaladaas 17kii Ramadaanka 223hijrada oo waafaqsan 12kii August sannadkii 838miilaadiga.

Furashadii jaziiradda Zaqliyah

H 212

Waxay ku taal jaziiraddan koonfurta talyaaniga, waxaana furay hoggaamiyihii caalimka ahaa Asad bin Al-Furaat Allaha u naxariistee, kaasoo shahiitay isagoo ay saameeyeen dhaawacyadii ka soo gaaray dagaalkaa, waxaana jaziiraddaa ka talineyey Muslimiinta in ka badan labo qarni iyo bar. Waxay ku faafiyeen cilmiga iyo ilbaxnimada iyo hababka wax loo dhiso. Waxaana la furay jaziiraddaa 9kii Ramadaaan sannadkii 212 hijrada waafaqsan 6 December sannadkii 827 hijrada.

Furashadii Andalus

H 92

Waxaa ku guuleystey Muslimiinta uu hoggaaminayey Diaariq bin Ziyaad kaddib dagaal weyn oo lala galay boqorki Labriiq, waxayna aheyd billowgii casriga cilmiga iyo xadaarada iyo nabad ku wada noolaanshaha muddo siddeed qarni 28kii bishii Ramadaan sannadkii 92 hijradi – waafaqsan 19/7/711 miilaadiga.

Maxaa loogu bixiyey Ramadaan?

Markay dooneen Carabta waagii jaahiliyadda (Islaamka ka hor) inay ka beddelaan magacyada bilaha luqaddii hore ee qadiimkA aheyd waxay u bixiyeen bilaha waqtiyada ay yimaadaan oo ku aaddan yihiin, marka bishan wuxuu waafaqay maalmo aad u kuleyl badan, markaasaa waxaa loo bixiyey **Ramadaan waxaa laga soo qaatay Ramdaa oo loola jeedo kuleylka badan**

Sida loogu bixiyeyba Rabiical awal iyo Rabiical thani bilaha waafaqsan xillaga gu’ga

Taariikhdeenna **Ramadaanka**

Ramadaanka waxaa soo maray taariikhda guulo badan iyo dhacdooyin taariikh leh, waxaana ka mid ah:

Furashadii Makkah

H 8

Wuxuuna Rasuulka Alle s.c.w. u galay si nabad ah dagaal la’aan, isagoo madaxa hoos u dhigaya isagoo u hoganaya oo u khushuucsan Allaah, wuxuu akhrinayey qowlka llaahay: “Dheh: Waxaa yimid xaqa, oo baadil baabba’a baa u sugnaaday, hubaal baadilka waa mid baabba’a ku dambeeya” waxayna dhacdadaas ahayd bil Ramadaan sannadkii siddeedaad ee hijrada, waafaqsan 10/1/630miilaadiga.

Ramadaankii u horreeyey ee la farad yeelay soomidda

H 2

Ramadaankii u horreeyey ee la farad yeelay soomidda waxay aheyd bishii labaad ee hijrada sannadkii 624 miilaadiga, markuu soo degey qowlka llaahay Kor ahaaye: “Mu’miniintow! Waxaa la idiinka faral yeelay soon, sidii loogu faral yeelaybá kuwii idinka horreeyay, si aad isaga jirtaan (xumaha)”. (Al-Baqarah: 183)

Soo degitaanka Qur’aanka

Pra-H 13

Wuxuu ku billowday soo degitaanka Quraanka Nabigeenna Muxammad s.c.w. isagoo jooga gebiga Xiraa, buurta hadda loo yaqaan jabal An-Nuur ee ku taal Makkah agteeda, markuu la soo degey Jibriil c.s. suuraddii u horreysey Qur’aanka (Ku akhri Magaca Rabbigaa ee abuuray) (Al-Calaq: 1), waxayna arrintaasi dhacday maalin Isiin ah 21 Ramadaan waafaqsan 10 August sannadkii 610 miilaadiga hijrada ka hor.

Duullaankii Badar

H 2

Waxay Muslimiinta kaga adkaadeen duullaankii Badar mushrikiintii Quraysh wuxuuna Qur’aanka ku magacaabay maalintaa (Maalinti kala baxa) waayo wuxuu dagaalkaa ahaa dagaalkii u horreyey islaamka ee dhex mara xaqa iyo baadilka, wuxuuna dhacay dagaalkaa 17kii Ramadaan sannadkii labaad ee hijrada waafaqsan 13/3/624,

Mashruuca: Muslim hage fudud **Farsamada:** Xasan Baa Haaruun **Waxaa isku dubbariday:** Shirkadda Ad-Daliil Al-Mucaasir

MODERN GUIDE